AWB
Asxaabta Walaalaha Buulaay

AWB
Asxaabta Walaalaha Buulaay

# XEER HOOSAADKA GOLAYAASHA IYO GUDDIYADA KALA DUWAN EE ASXAABTA WALAALAHA BUULAAY (AWB)

**LUULYO 2025**

# XEER-HOOSAADKA GOLAYAASHA IYO GUDDIYADA KALA DUWAN

## 1. QODOBKA KOOWAAD: MAGACA HAY'ADDA

1.1 Asxaabta Walaalaha Buulaay
1.2 Marka la soo gaabiyo (AWB)

## 2. QODOBKA LABAAD: HIMILADA IYO UJEEDDOOYINKA (AWB)

In la dhiso bulsho is jecel oo is kaashata, isla markaana la soo celiyo kalsoonidii, sharaftii iyo walaaltinimadii dadka reer Buulo Burte; iyo in lana abuuro fursado lagu badbaadiyo nafta dadka, korna loogu qaado awoodda dadka masaakiinta ah iyo agoonta ku nool degmada iyadoo diiradda saarayo adeegyada bulshada iyo waxbarashada. Ujeeddooyinkeeduna waa:

- Soo celinta kalsoonida, sharafta iyo walaaltinimada dadka deegaanka
- Abuurista adeegyo bulsho iyo waxbarasho oo loogu tala galay carruurta iyo agoonta
- Dhaqangelinta mashaariic horumarineed oo wax ka tara burburka dhaqan dhaqaale
- Xoojinta xiriirka deegaanka iyo jaaliyadaha dibadda

## 3. QODOBKA SADDEXAAD: MABAADI'DA AWB

- **Hiigsi fog, shaqo badan iyo joogtayn:** Reer Buulo Burte waxay u guntan yihiin sidii ay ku gaari lahaayeen hadafka iyo hiigsiga fog ee laga leeyahay AWB
- **Isku kalsoonaan:** Reer Buulo Burte waxay ku kalsoon yihiin awoodooda
- **Hufnaan/daah furnaan:** Reer Buulo Burte waxay diyaar u yihiin in ay wax walba si daah furan u maamulaan
- **Isla xisaabtan:** Reer Buulo Burte waxay diyaar u yihiin in ay isla xisaabtamaan lalana xisaabtamo
- **Caddaalad:** Reer Buulo Burte waxay diyaar u yihiin inay sameeyaan caddaalad dhexdooda ah iyo inay dadka kale ah kula dhaqmaan caddaalad
- **Go'aan xor ah:** Reer Buulo Burte waxaa ka go'an in ay iyagu is maamulaan oo ay arrimohooda ka tashadaan go'aanna ka gaaraan

## 4. QODOBKA AFARAAD: QAAB DHISMEEDKA GUDDIYADA AWB

Guddiyada AWB waxay ka kooban yihiin:

4.1. Golaha aasaasayaasha oo ka kooban soddon iyo shan xubnood (35), golahaas oo laga soo dooranayo guddiga fulinta oo ka kooban sagaal xubnood (9)
4.2. Golaha La-Taliyayaasha oo ka kooban toddoba xubnood (7)
4.3. Wakiillada dalalaka dibadda oo ka kooban hadba inta loo baahan yahay

## 5. QODOBKA SHANAAD: GOLAHA AASAASAYAASHA

5.1 Waxay ka kooban yihiin soddon iyo shan qof oo macayadoodu ay kala yihiin:

1. Jamaal Bashiir Yuusuf
2. Xasan Shiikh Maxamed Balcad
3. Maxammed Ciise Nuux
4. Maxammed Xaaji Kuweyt
5. Safiya Maxammed Cusmaan
6. Sahro Cifaaf Weheliye
7. Cabdikaafi Shiikh Ibraahim
8. Dr. Sacdiya Maxamuud Shiikh
9. Bashiir Cadceed Xalane
10. Cabdi Daahir Cusmaan
11. Maxamed Xirsi Shire
12. Nucmaan Shiikh Cumar
13. Rufaaci Mustaf Xaaji Shirwac
14. Maxamed Xabeeb
15. Cali Xasan Maxamed
16. Khadiijo Muuse
17. Faadumo Qaliif Guuleed
18. Sh Cabdicasiis Cabdulle Guure
19. Xirsiyo Cabdule Jiiqley
20. Maryan Xaaji Ciise
21. Baduuro Siciid Taabit
22. Axmed Aadan Jiraabeey
23. Maxammed Aadan Dhuuboow
24. Maxammed Cabdi Shiikh
25. Jeylaani Jiir Miisaad
26. Ayaan Axmed Diiriye
27. Cali Daahir Xerow
28. Ibraahim Cabdi Bulitiko
29. Cabdullaahi Axmed Weheliye
30. Abdikariin Sh Cilmi
31. Cabdiraxmaan Axmed Weheliye
32. Cabdifataax Abshir Xareed
33. Jamiilo Cabdi Subeer
34. Cabdullaahi Muumin
35. Macallin Xassan

## 6. QODOBKA LIXAAD: GUDDIGA FULINTA

6.1 Waxay ka kooban yahiin sagaal xubnood oo magacyadoodu ay kala yihiin:

1. Cabdi Daahir Cusmaan
2. Maxammed Ciise Nuux
3. Xasan Shiikh Maxamed Balcad

4. Maxammed Xaaji Kuweyt
5. Cabdikaafi Shiikh Ibraahim
6. Rufaaci Mustaf Xaaji Shirwac
7. Maxamed Xirsi Shire
8. Jamaal Bashiir Yuusuf
9. Bashiir Cadceed Xalane

## 7. QODOBKA TODDOBAAD: GOLAHA LA-TALIYAYAASHA

7.1 Waxay ka kooban yahiin 7 xubnood oo macayadoodu ay kala yihiin:

1. Maxamed Siciid Taabit
2. Yusuf Shiikh Cumar
3. Cabdi Cashuur Xasan
4. Shiine Maxamuud Guhaad
5. Cabdirahmaan Cumar Gaagaale
6. Jamiilo Fiqi
7. Farxiyo Muumin Cali

## 8. QODOBKA SIDDEEDAAD: WAKIILLADA DALALKA DIBADDA IYO GUDAHA

1. Baduuro Siciid Taabit & Safiyo Goome(Virginia & Washington)
2. Cali Xasan Maxamed (Minnesota & Milwaukee)
3. Istahil Cali Cumar & Khadiija Goome (Toronto)
4. Xuseen Cabdulle Weheliye (Soomaaliya)
5. Cabdullaahi Muumin (Buulo Burte)

## 9. QODOBKA SAGAALAAD: SHIRARKA GOLAYAASHA IYO GUDDIYADA AWB

**9.1 Shirweynaha guud:**

9.1.1 Shirwaynaha guud waa xubinta ugu saraysa xagga sharciga iyo awoodaba, wuxuuna ka qeyb galaya:

A. Xubnaha golaha aasaasayaasha
B. Xubnaha golaha la-taliyayaasha
C. Xubnaha ku metela dalalka dibadda iyo gudaha

9.1.2 Shirwaynaha guud waxaa la qabanayaa sannadkiiba mar, iyadoo laga tirinayo maalintii uu xirmay shirwaynihii ugu danbeeyay

9.1.3 Goobta iyo maalinta la qabanayo shirweynaha guud waxaa soo jeedinaya guddiga fulinta, waxaana cod haldheeri ah ku ansixinaya golaha aasaasayaasha laba bilood ka hor inta aan la gaarin waqtiga

9.1.4 Shirweynaha guud oo keliya ama shirweyne aan caadi ahayn oo keliya ayaa lagu baddeli karaa qodob ama qodobbo xeerka ka mid ah, wuxuuna dhici karaa oo kaliya hadii saddex dalool laba dalool (2/3) tirada xubnaha ee ka soo qeyb galay shirka ay isku raacaan

### 9.2 Shirweynaha aan caadiga ahayn

9.2.1 Shirweyne aan caadi ahayn ayaa la qaban karaa haddii ay kallifto duruuf ayna soo jeediyaan saddex dalool hal dalool (1/3). Shirweynaha aan caadiga waxaa soo qaban qaabinaya guddiga fulinta, waxaana ansixinaya golaha aasaasayaasha

9.2.2 Waqtiga la qabanayo shirweynaha aan caadiga ahayn, waa inay gudiga fulinta muddo laba usbuuc ah ugu gudbiyaan golaha aasaasayaasha waana in lagu ansixiyaa saddex dalool laba dalool (2/3) tirada xubnaha golaha aasaasayaasha

### 9.3 Shirarka guddiyada kala duwan

9.3.1 Guddiga fulintu waxay yeelanayaan shirar joogto ah waxayna ku wada hadlayaan khadka internetka labadii usbuucba mar

9.3.2 Golaha La-Taliyayaashu waxay yeelanayaan shirar joogto ah waxayna kulmayaan ama ay ku wada hadlayaan khadka internetka sannadkiiba afar mar

9.3.3 Xubnaha guddiga oo idil waxaa waajib ku ah inay ka soo qeyb galaan shirarka joogtada ah

9.3.4 Waqtiga ay fadhinayaan xubnaha golayaasha iyo guddiya kala duwan waa saddex sannadood

## 10. QODOBKA TOBNAAD: KU HADALKA MAGACA HAY'ADDA (AWB)

Guddiga fulinta iyo golaha la-taliyayaasha oo kaliya ayaaa awood u leh inay ku hadlaan maagaca AWB

## 11. QODOBKA TABAN IYO KOOWAAD: BALLANQAAD

Anigoo ah:………………………………………………………………………………………
Waxaan taageerayaa mabaadi'da Asxaabta Walaaha Buulaay (AWB), waxaanan aqbalay ka mid noqshada xubnaha golayaasha ama guddiyada sare ku xusan.
Waxaan ballan qaadayaa inaan si daacad ah ugu shaqeynayo, raacayana oo aan ku dhaqmayo xeer hoosaadka AWB iyo shuruudaha u taalla Guddiyada.